

Iskaashi Wax wada barasho

Iyadoo loo marayo hal-abuurka Guusha Ardayda, Dugsiyaddaha Sare waxay bixiyaan barnaamijyo la balaariyay si ay u buuxiyaan shaqsiga ardayga qaababka uwajaho waxbashada waxyaabaha uu xiiseeyo. Barnaamijyadan waxay ardaydu u oggolaataa in ay badeshaan qirbadda dugsiga sare iyagoo u maraya dalabyo dhowr ah oo cusub iyo dalabyo waxbarasho oo la wanaajiyay. Dalabyadan waxaa ku jira Laba Dhibco (Dual Credit), Takhasusyada Xirfaddaha Gaarka (Specialist High Skills Majors) iyo Iskaashi Wax wada barasho.

Barnaamijyadan waxay ka caawinayaan in ay buuxiyaan baahida, xiisaha iyo kartida dhamaan ardayda, ku hanuuniya waxbarashada oo sida wanaagsan ugu diyaariya qallan-jebinta iyo wixii dhaafsiisan.

Waa maxay Iskaashi wax wada barasho (Co-op)?

- Iskaashi wax wada barasho waa barnaamij ay wasaaradda ansaxisey kaasoo u oggolaada in ardaygu dhibcaha uu kasbado inta uu ku sii jiro meeleyn shaqo. Barnaamijka wuxuu ka kooban yahay koorsooyinka co-op ah oo ayna la socdaan macalin ah Iskaashi wax wada barasho, koorso manhajta la xiriirta ee maado kasta, iyo meeleyn shaqo.
- Ardaydu waxay dalban karaan laba dhibco co-op ah oo ku aaddan maadooyinka la iskaga baahan yahay qallin-jebinta dugsiga sare, iyadoon jirin wax xadidan oo ay ku kasban karaa dhibcaha co-op ikhtiyaariga ah. Meeleynta co-op waxaa ardayda u habeysta dugsiga sare oo waa in ay raacaan qaanuunka iyo tilmaamaha Wasaaradda Tacliinta.

Yaa loogu tala galey?

- Barnaamijyada co-op waxaa loogu talogaley ardayda dugsiga sare dhigata kuwaasoo gali rabo xirfad shaqo barasho, kulyad, jaamacad ama goob-shaqo.

Manfacyada ugu weyn ee barnaamijyada co-op

Ardayda co-op waxay fursad u leeyihiin in:

- Helaan qibrad waxbarasho gacan-ku-qabasho ah
- Dalabyo shaqo ay ku “tijaabin” karaan
- Ay arkaan waxbarashada fasalkooda quseeya
- Kasbadaan dhibco iyagoo usoo muraya qibradda shaqo
- Ay la yimaadaan xirfaddaha assaasiga u ah iyo caadooyin looga baahan yahay goobta shaqo
- Ay kororsadaan qibrad shaqo qiimo leh kaasoo ka caawini karta inay sameystan taariikh shoqo (resumé) ee barnaamijyada waxbarashada dugsiga sare ka dambeyna iyo shaqooyinkooda mustaqbalka.

Halkee ayaa laga bixiyaa barnaamijyada co-op ka? Sidee baan wax badan ku oggaan karaa?

- Dhammaan iskuulada gobolka Ontario waxay bixiyaan barnaamijyada co-op. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah la xiriir maamulaha iskuulkaaga ama Madaxa Guusha Ardayda ee guddiga Iskuulkaaga. Macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan Iskaashi Wax wada barasho waxaad ka heli kartaa: www.ontario.ca/studentsuccess.